Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Hadal-qoraaalka kalfadhiga 4aad
Documentiga Kulankii 24aad **Taariikhda: 07/05/2014**

Kalfadhga 4aad
Kulankiisii 24aad
Saacada la furay: 11:05 am
Saacada la xiray: 1:00 pm
Guntanka: 172 xildhibaan

Ajendaha:

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **U-codaynta Miisaaniyad-Sanadeedka 2014**
4. **Doodda Heshiiskii Shirkadda Favori.**

Shir-Guddoonka: Guddoomiye ku xigenka 1-aad Golaha Baarlamaanka

Mudane Jeylaani Nuur Iikar

Waxaa shirka furey Guddoomiye ku xigenka 1-aad Golaha Baarlamaanka Mudane:Jeylaani Nuur Iikar,waxaa lagu furey Aayadaha Qur'aanka kariimka Ka Akhriyey, XildhibaanSheekh Shaacir Guddoomiyaha waxa uu xildhibaanada uu weydistey in ay ansixiyan Ajendaha miisaaniyada. Guddoomiyaha ayaa soo jeediyey in cod loo qaadeyo miisaniyad sanad-eedka 2014ka.

Codkiina sidan ayuu u dhacay.

Inta Ogolaatey---------- 162 xildhibaan

Inta Diidey ---------- 7 xildhibaan

Inta Aamustey---------- 3 xildhibaan

Guddoomiyaha ayaa kudhawaaqey waa ansax Miisaaniyad sanadeedka 2014ka**.** Guddoomiyaha ayaa ku soo dhaweeyey Wasiiru dowlaha wasaarada maali-yadda Mudane: C/laahi Maxamed Nuur. wuxuu soo jeediyey, mahadnaq uu u mahad celinayo, Guddoonka Baarlamaanka iyo xukuumada, xildhibaanada sidii ay ugu qeyb qaateen ansixinta iyo ogolaashaha, mudada ay ka soo shaqeynayeen miisaaniyada oo aheyd 8bilood waan idiin hambalyeynayaa dhamaan sidii wanaagsaneyd ee aad u ansixiseen miisaaniyadda 2014ka.

Guddoomiyaha ayaa u yeerey Guddiga Gaadiidka Garoomada Dekadaha iyo Wadooyinka iyo Tamarta.

Xildhibaan Cusmaan Dhuubow Guddoomiyaha Guddiga Guddiga Gaadiidka Garoomada Dekadaha iyo Wadooyinka iyo Tamarta, waxa uu Golaha Baarlamaanka ka hor Akhriyey shaqadii ay soo qabteen iyo talo bixintii Guddiga, isagoo guddoomiyaha guddiga si faah-san u akhriyey warbixintaas.

Guddoomiyaha ayaa sheegey in ay bilaabaneyso doodii shirkada favori.

Xildhibaan C/raxmaan Axmed Suge wuxuu soo jeediyey shirkadan favori in 3-jeer lakeeney baarlamankala si uu oga doodo Baarlamaanka guddigana wey ka soo shaqeeyen cod hala galiyo Guddoomiye.

Xildhibaan C/laahi Maxamed Ciise wuxuu sheegey in warbixinta guddiga wey ku mahasan yihiin balse waxan qabaa in sharciga la waa fajiyo waa (2-Agree-ment) mana jirto cid hanan karto, waa in sharciga la soo wafajiyaa.

Xildhibaan Zeynab Maxamed Caamir waxey soo jeedisey,wadankena waxa Ka shaqeeya shirkada oo aan Baarlamaanka ansixin wasiir kasto isagaa kensanaayo oo hishiis la galaayo shirkadii **SkA** wey wanaagsanayeen oo Airporka ayay inoo hagajiyeen, aniga waxaan qabaa in shirka Favori la laalo.

Xildhibaan Maxamed Cabdule Gesey wuxuu sheegey marka shirkad laga had-laayo waa dad wax isku darsadey dhulkaan ay ku shaqeysaneyso shirkada ya Iskaleh aniga waxaan u arkaa qolo wax keento iyo qolo wax dafta (Airpor)ka looma waayin soomaali maalgalisa oo ganacsato ah, anaga waxaa nahey Baarlamaankii sharciga dajinayey, waxaan dooneynaa in halkan la soo istaaj-iyo wasiirkii ku shaqada lahaa oo lala xisaabtamo.

Xildhibaan Mamuud Maxamed Xeyd wuxuu soo jeediyey, waxaa la doonayaa in la sameeyo guddi Qandaraaska bixiya, waa in loo bandhigaa tar-tamayaal oo ah ganacsato iyo inta daneyneyso, shirkadii hore iyo tan hada midna sharci kuma imaan, waa in shirkada favori la eryo.

Xildhibaan Maxamed Cumar Dhalxa wuxuu sheegey,sharciga aan ku shaqeyno in uu waafaqsanyahay sharciga muslinka, shirkadaha jooga wadanka boqolal ayay ku dhowyihiin Air port 6 shirkadood ayaa ka shaqeysa,dowladan hishiiska ay gasho lama yaqaan Amison qandarasyo badan ayay ku jirtaa diyaaradaha imaanayo lagama warhayo, waxaan qabaa in aan ladadajin oo laga fiirsado.

Xildhibaan Cabdala Bos Axmed wuxuu soo jeediyey, arintaan aan ka Hadleyno waa xasaasi, waa Airport dhowr goor ayey soo noq-noqotey waa shirkado la la galey hishiis suuq madow, waxa wadanka jooga 7-shirkadood, waxaa timid mid ka duwan kuwii hore Favori xalaalna kuma soo galin, waxey xumeynayaan dowlado aan cilaaqad la leenahay meel noo dhaqan maleh cirka iyo dhulka. Nimanka madaxda ee fulinta waa la idiin wada jeeda, waxan qabaa in shaqada laga joojiyo Favori, go'aanka ay xildhibaanada gaaren waa in la fuliyaa.

Xildhibaan Cali Aadan Xuseen Elow wuxuu sheegey,arintan wax badan ayey soo laabatey hadii ay wax ku jirin maxey u soo laa-laabatey, Hindise Sharciyada kale isla markiiba waa la ansixiyaa, waxan qabaa in lagu celiyo xukuumada hadii ay raali ka tahey in ay soo gudbiso qoraal, wey buuxan shirkado turki ahoo kaliya yaan la saarin culeyska, halagu celiyo xukuumada.

Xildhibaan Cali Bare Jibriil wuxuu sheegey garoonka 20-sano in ka badan ayaa shacab ilaalinayey ganacsatada looma ogola, waa in aad matashan wadanka Baarlamaankow hala kala saaro Qaranimada iyo wax tarka, waxaa caalamka nalaga aaminsan yahay in aanahey nacamleeyayaal, marka aan is-xisaabino wixii sharciga waafaqsan aan ku dhaqano dabagal aanku sameyno.

Xildhibaan:Axmed Aabi wuxuu soo jeediyey, waa soo noq-noqotey arintaan anaga iyo Guddoonka an daba galno go'aan aanka gaarno, hada ka hor waxaa jirtey go'aan la gaarey oo waxba aan laga qaban aan isku raacno in la eryo shirkadan Favori.

Xildhibaan Cali Nuur Boodaye,point of order, guddiga waxa uu ka kooban yahay 14- xubnood 8-xubnood saxiixdey qodobada uu cuskadey sharciga ma waafaqsana, arintaan waxaa la sameeyey markii aan fasaxa ku jirney, heshiisk-an ma quseyo (civil aviation). Waa arin ay guddiga ku tagri faleen, heshiiskan sida uu u qoran yahay maahan sida danta ku jirto,waxaa jira guddiyo badan oo kala kulmi doonan caqabado, waayo xildhibaanada qaarkood ayaa ganacsa-to ah, uu doonaayo in uu helo lacago badan, raba in uu bixiyo wax yar waxaan qabaa hishiiskaan in la saxo.

Guddoomiyaha wuxuu soo jeediyey arintaan waxey aheyd in uu guddiga kula noqdo maadaama xildhibaanka ka mid ah guddiga uu soo jeediyey in uu shar-ciga waafaqsaneyn, marka guddiga ay is arkaan ka dib ha naloso celiyo.

Shir Guddoonka. Guddoomiye ku xigenka 1aad ee Golaha Shacabka, MudaneJeylani Nuur Iikar, oo shir Guddoominayey kalfadhiga 4aad kulankiisa 24aad ayaa sheegey in uu shirka xiran yahay sacada markey aheyd 1:00pm